DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
XAFIISKA
GARYAQAANKA GUUD

ولاية بونت لاند
الصومالية
مكتب
المحامي العام للدولة

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE SOLICITOR GENERAL

| SANADKA 25AAD | CADADKA 9AAD | TAARIIKH: 26/9/25 | Lam. 05 |
|---|---|---|---|

# FAAFINTA RASMIGA AH

# OFFICIAL GAZETTE

# الجريدة الرسمية

## wax-ka-bedelka Xeerka Tacliinta Sare Dowladda Puntland


| TUSMADA | |
|---|---|
| **Qeybta 1aad** | *Xeerarka Baarlamaanka iyo Heshiisyada Caalamiga ah*<br>**wax-ka-bedelka Xeerka Tacliinta Sare Dowladda Puntland** |
| **Qeybta 2aad** | *Xeerarka iyo Digreetooyinka Madaxweynaha.*<br><br>*WAXBA MALEH* |
| **Qeybta 3aad** | *Xeer Nidaamiyeyaasha Wasaaradaha, Xeerarka Goleyaasha Deegaanka iyo Barnaamijyada Dowladda.*<br><br>*WAXBA MALEH* |
| **Qeybta 4aad** | Go'aanmada Maamulada iyo Qaraarada Maxkamadaha.<br><br>WAXBA MALEH |
| **Qeybta 5aad** | Amarada, Ogeysiisyada iyo Qandaraasyada Dowladda.<br><br>WAXBA MALEH |


GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

XAFIISKA
MADAXWEYNAHA

ولاية بونت لاند
الصومالية

مكتب
الرئيس

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**Sharciga Lr. 005 ee 25-ka Sibteembar 2025, kuna saabsan Wax-ka-bedelka Xeerka Tacliinta Sare Dowladda Puntland.**

**Madaxweynaha Dowladda Puntland**

**Markuu arkay:** Dastuurka Dowladda Puntland Qodobkiisa 80-aad farqadiisa 16-aad.

**Markuu arkay:** Ansixinta Golaha Wakiilada Dowladda Puntland ee Summadeedu tahay XGGW/DPL/25/2025, kuna taariikhaysan 10-ka Agoosto 2025.

**Markuu Tixgeliyey:** Baahida loo qabo wax-ka-beddelka Xeerka Tacliinta Sare ee Dowladda Puntland, si loo horumariyo tayada tacliinta sare, loo dhiirrigeliyo cilmi-baarista iyo hal-abuurnimada, loona taageero xarumaha waxbarashada, isla markaana loo fududeeyo iskaashiga caalamiga ah.

**<u>Wuxuu soo saaray</u>**

**Sharciga soo socda:**

**Qodobka 1-aad**

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen Wax-ka-beddelka Xeerka Tacliinta Sare ee Dowladda Puntland

**Qodobka 2-aad**

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala kaydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda.

**Qodobka 3-aad**

Dhaqangal Sharcigani wuxuu noqonayaa markuu Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dowladda Puntland.

**Siciid Cabdullaahi Deni**
Madaxweynaha Dawladda Puntland

**Tix:-XGGW/DPL/25/2025** **Garoowe, Axad** **Taariikh: - 10/08/2025**

**Ku:- Madaxweynaha Dawladda Puntand** **Garoowe**

**Ujeeddo:-Ansixinta Wax-ka-beddelka Xeerka Tacliinta Sare Dawladda Puntland**

**Mudane Madaxweyne,**

**GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADU: -**

**MARKUU ARKAY:-** Qodobada **60-aad (1), 64-aad (1), 68-aad(t)** iyo **70-aad (1)** ee Dastuurka Dawladda Puntland.

**MARKUU ARKAY:-** Qodobadda **2-aad (1), 3-aad (1), 57-aad(2)** iyo **58-aad** ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiillada Dawladda Puntland.

**MARKUU ARKAY:-** Soo gudbinta Madaxweynaha Ref: MW/DPS/204/2025 ee June 24, 2025, kuna saabsan wax-ka-beddelka Xeerka Tacliinta Sare Dawladda Puntland.

**MARKUU TIX-GELIYEY: -** Baahida loo qabo Wax-ka-beddelka Iyo Kaabista Xeerka Tacliinta Sare Dawladda Puntland.

**MARKUU DHEGEYSTEY: -** Dooddii iyo Go'aankii Golaha Wakiilladu kalfadhiga 56-aad, Fadhigiisii 15-aad ee 13.07.2025 cod gacanta tag ah ku Ansixiyeen wax-ka-beddelka Xeerka Tacliinta Sare Dawladda Puntland. Guntanka fadhiga oo ahaa (**34**) Mudane, waxaa ugu codeeyey oggol (**30**) Mudane, Diidmo majirin, halka ay ka aamuseen (**4**) Mudane.

**WUXUU GUDDOOMIYEY:-**

**Ansixinta Wax-ka-beddelka Xeerka Tacliinta Sare Dawladda Puntland.**

**Wada Shaqeyn Wacan**

**Md. Cabdirisaaq Axmed Siciid**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.**

XAFIISKA GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADA PUNTLAND ★ OFFICE OF THE SPEAKER OF PUNTLAND STATE HOUSE OF REPRESENTATIVES

# DAWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA
# GOLAHA WAKIILLADA PUNTLAND

---

# WAX-KA-BEDDELKA XEERKA TACLIINTA SARE EE PUNTLAND

**GAROOWE, LUULYO, 2025**

STATE GENERAL SOLICITOR

## Tusmada

Bogga

CUTUBKA 1-aad ..... 1

HORDHAC ..... 1

**Qodobka 1-aad ..... 1**

**Magaca Xeerka ..... 1**

**Qodobka 2-aad ..... 1**

**Eray Bixin ..... 1**

**Qodobka 3-aad ..... 3**

**Ujeeddada Xeerka ..... 3**

**Qodobka 4-aad ..... 4**

**Baaxadda Xeerka ..... 4**

**Qodobka 5-aad ..... 4**

**Mabaadi'da Guud ee Xeerka ..... 4**

CUTUBKA 2-aad ..... 5

GUDDIGA TACLIINTA SARE ..... 5

**Qodobka 6-aad ..... 5**

**Dhismaha Guddiga Tacliinta Sare ..... 5**

**Qodobka 7-aad ..... 5**

**Qaab-dhismeedka Guddiga ..... 5**

**Qodobka 8-aad ..... 5**

**Xubinnimada Guddiga ..... 5**

**Qodobka 9-aad ..... 6**

**Habraaca Magacaabista Guddiga ..... 6**

**Qodobka 10-aad ..... 7**

**Shuruudaha Lagu Lumin Karo Xubinnimada Guddiga ..... 7**

**Qodobka 11-aad ..... 7**

**Shuruudaha Xoghayaha Guddiga ..... 7**

**Qodobka 12-aad ..... 8**

**Awoodaha iyo Waajibaadka Guddiga ..... 8**

**Qodobka 13-aad ..... 9**

**Waajibaadka Guddoomiyaha ..... 9**

**Qodobka 14-aad ..... 10**

**Waajibaadka Guddoomiye -ku-xigeenk .............................................. 10**
**Qodobka 15 -aad: ........................................................................... 10**
**Waajibaadka Xoghayaha Guddiga ................................................... 10**
**Qodobka 16-aad .............................................................................. 11**
**Kulamada iyo Go'aannada Guddiga ................................................... 11**
**Qodobka 17-aad ............................................................................... 11**
**Warbixin-Sannadeedka Guddiga ........................................................ 11**
**Qodobka 18-aad ............................................................................... 12**
**Miisaaniyadda iyo Maaliyadda Guddiga ............................................ 12**
CUTUBKA 3-aad ..................................................................................... 13
AASAASIDDA IYO AQOONSIGA HAY'ADAHA TACLIINTA SARE ......................... 13
**Qodobka 19-aad ............................................................................... 13**
**Aasaasidda Hay'adaha Tacliinta Sare ................................................ 13**
**Qodobka 20-aad ............................................................................... 13**
**Bixinta Aqoonsiga ............................................................................ 13**
**Qodobka 21-aad ............................................................................... 14**
**Muddada Aqoonsiga ......................................................................... 14**
**Qodobka 22-aad ............................................................................... 14**
**Kala Noqoshada Aqoonsiga ................................................................ 14**
**Qodobka 23-aad ............................................................................... 15**
**Aqoonsiga Jaamacadaha Shisheeye .................................................... 15**
CUTUBKA 4-aad ..................................................................................... 15
HA'YADAHA TACLIINTA SARE ................................................................. 15
**Qodobka 24-aad ............................................................................... 15**
**Heerarka Shahaadooyinka Hay'adaha Tacliinta Sare .......................... 15**
**Qodobka 25-aad ............................................................................... 16**
**Xarumaha Waxbarashada Tacliinta Sare ............................................ 16**
**Qodobka 26-aad ............................................................................... 16**
**Waajibaadka Hay'adaha Tacliinta Sare .............................................. 16**
**Qodobka 27-aad ............................................................................... 17**
**Shakhsiyad Qaanuuneed ................................................................... 17**
**Qodobka 28-aad ............................................................................... 17**
**La-talinta iyo Hagidda Ardeyda ......................................................... 17**
CUTUBKA 5- aad ..................................................................................... 18

HABKA MAAMULKA HA'YADAHA TACLIINTA SARE ........ 18

Qodobka 29-aad ........ 18

Jaamacdaha iyo Kulliyadaha Dawladda ........ 18

**Qodobka 30-aad ........ 18**

**Hay'adaha Tacliinta Sare Ee ........ 18**

**Gaarka Loo Leeyahay ........ 18**

**Qodobka 31-aad ........ 18**

**Guddoomiyaha iyo Guddoomiye ........ 18**

**ku-xigeennada Jaamacad Dawladeed ........ 18**

**Qodobka 32-aad ........ 19**

**Hawl-wadeennada Jaamacadda ........ 19**

**Qodobka 33-aad ........ 19**

**Ururka Ardayda ........ 19**

**Qodobka 34-aad ........ 19**

**Ururka Qalin-jabiyaasha Ardayda ........ 19**

**Qodobka 35-aad ........ 19**

**Kulamada Hay'ad Tacliin Sare ........ 19**

**Qodobka 36-aad ........ 20**

**Cilmi-baarista Ha'yadaha Tacliinta Sare ........ 20**

CUTUBKA 6-aad ........ 20

MAALIYADDA GUUD EE JAAMACADAHA ........ 20

**Qodobka 37-aad ........ 20**

**Dakhliga Jaamacadaha Dawladda ........ 20**

**Qodobka 38-aad ........ 20**

**Hanti-kasbasho ........ 20**

**Qodobka 39-aad ........ 20**

**Maalgelinta Dakhliga ........ 20**

**Qodobka 40-aad ........ 21**

**Xisaabaadka iyo Hanti-dhawrka ........ 21**

**Qodobka 41-aad ........ 21**

**Sannad-maaliyadeedka ........ 21**

**Qodobka 42-aad ........ 21**

**Maamulka Maaliyadda Jaamacadaha Gaarka ah ........ 21**

CUTUBKA 7-aad ........ 22

GANAAXYADA HANNAANKA CABASHOOYINKA IYO CIQAABAHA....................22
**Qodobka 44-aad ....................................................................................22**
**Ganaaxyada Maamul ............................................................................22**
**Qodobka 45-aad ....................................................................................23**
**Noocyada Ganaaxyada Maamul .............................................................23**
**Qodobka 46-aad ....................................................................................23**
**Hannaanka Cabashada ..........................................................................23**
**Qodobka 47-aad ....................................................................................24**
**Ciqaabaha ............................................................................................24**
CUTUBKA 8-aad ....................................................................................24
QODOBADA QUBANAHA .........................................................................24
**Qodobka 48-aad ....................................................................................24**
**Magac-ka-beddelka Hay'ad Tacliin Sare ................................................24**
**Qodobka 49-aad ....................................................................................24**
**U-hoggaansanaan La'aanta Xeerkan .....................................................24**
**Qodobka 50-aad ....................................................................................25**
**Isku-biiridda Hay'ado Tacliin Sare ee Dawladeed ....................................25**
**Qodobka 51-aad ....................................................................................25**
**Ka ilaalinta Qaan-dhabid Shakhsiyadeed ...............................................25**
**Qodobka 52-aad ....................................................................................25**
**U Qoolnaanta Waxyeellooyinka ............................................................25**
**Qodobka 53-aad ....................................................................................26**
**Xeer Nidaamiyeyaal iyo Habraacyo .......................................................26**
**Qodobka 54-aad ....................................................................................26**
**Burin ...................................................................................................26**
Qodobka 55-aad .....................................................................................26
Dhaqan-galka Xeerka ..............................................................................26

## CUTUBKA 1-aad
## HORDHAC

## Qodobka 1-aad
## Magaca Xeerka

Xeerkan waxaa lagu magacaabaa Xeerka Tacliinta Sare ee Dawladda Puntland

## Qodobka 2-aad
## Eray Bixin

Xeerkan gudihiisa haddii aan si kale loo fasirin, ereyada soo socda waxaa micnahoodu noqonayaa sidan: -

| L.r | Erayga | Macnaha |
|---|---|---|
| 1. | **Dawlad** | Waxaa loola jeedaa Dawladda Puntland ee Soomaaliyeed. |
| 2. | **Dastuur** | Waxaa loola jeedaa Dastuurka Dawladda Puntland. |
| 3. | **Xeer** | Waxaa loola jeedaa Xeerka Tacliinta Sare ee Dawladda Puntland. |
| 4. | **Xeer- hoosaad** | Waxaa loola jeedaa Axdiga loo oggolaaday Jaamacadda inay ku dhaqanto sida ku xusan qodobada Xeerkan. |
| 5. | **Wasaarad** | Waxaa loola jeedaa Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare ee Dawladda Puntland. |
| 6. | **Wasiir** | Waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare DPL. |
| 7. | **Guddi** | Waxaa loola jeedaa Guddiga Tacliinta Sare. |
| 8. | **Tacliin Sare** | Waxaa loola jeedaa waxbarasho jaamacadeed. |
| 9. | **Xoghayn** | Waxaa loola jeedaa Xoghayaha Guud ee Guddiga Tacliinta Sare. |
| 10. | **Golaha Jaamacadda** | Waxaa loola jeedaa Golaha Fulinta Jaamacadda, Maamulka iyo Golaha Sare. |
| 11. | **Jaamacad Dawladeed** | Waxaa loola jeedaa Jaamacad lagu asaasay ama lagu socodsiiyo hanti Dawladeed. |
| 12. | **Jaamacadda Gaarka ah** | Waxaa loola jeedaa Jaamacad lagu asaasay ama lagu socodsiiyo hanti gaar loo leeyahay. |

| | | |
|---|---|---|
| 13. | **Jaamacad La Wada Leeyahay** | Waxaa loola jeedaa jaamacad lagu asaasay ama lagu socodsiiyo hanti ka wada timaadda dawladda, dad ama hay'ado gaar ah. |
| 14. | **Jaamacad Shisheeye** | Waxaa loola jeedaa jaamacad ku taal meel ka baxsan dawladda Puntland, taasoo muraadkeedu yahay inay bixiso waxbarasho jaamacadeed Puntland dhexdeeda. |
| 15. | **Hay'ad Tacliimeed** | Waxaa loola jeedaa Jaamacad ama kulliyad, mid guud ama gaar ah ama meel gebi ahaan ama qayb ahaan loo adeegsado inay bixiso waxbarasho Jaamacadeed, waxbarasho farsamo ama mid tababar. |
| 16. | **Aqoonsi** | Waxaa loola jeedaa hannaanka ay guddigu ku aqoonsadaan, kuna siiyaan shahaadada xaqiijinaysa in hay'adaas waxbarasho dhammaystirtay, dhammaan halbeegyada akaadeemiga, tababarrada iyo baratanka sarreeya, kuwaasoo ay dejiyeen guddiga tacliinta sare si waafaqsan xeerkan. |
| 17. | **Hawl-wadeennada Akaadeemiga** | Waxaa loola jeedaa qof walba oo loo magacaabay inuu baro, tababaro ama cilmi baaris ka sameeyo hay'ad tacliin sare ama hawl-wadeen kale oo ay magacaabeen Golaha Jaamacadda. |
| 18. | **Daneeyayaasha** | Waxaa loola jeedaa qof ama koox ama dad ku lug leh waxbarasho, tababar, machad cilmi-baaris iyo cid kasta oo ku lug leh tacliinta sare. |
| 19. | **Dibloomada** | Waxaa loola jeedaa heer marag-aqooneed ka hooseeya digrii kana sarreeya shahaado dugsi sare ama wax u dhigma. |
| 20. | **Digrii** | Waxaa loola jeedaa marag-aqooneed heerka koowaad ee jaamacadda. |
| 21. | **Shahaado** | Waxaa loola jeeda marag-aqooneed heerarka kala duwan ee waxbarasho ama wax u dhigma. |
| 22. | **Arday** | Waxaa loola jeedaa qof walba oo iska diiwaangeliyey hay'adaha tacliinta sare. |
| 23. | **Arday Jaamacad Dhammaysay** | Waxaa loola jeedaa xubnaha ka qayb gala shirarka ururka ardayda horay uga qalinjebisay hay'adaha waxbarashada sare. |

| | | |
|---|---|---|
| **24.** | **Maalgeliye** | Waxaa loola jeedaa qof kasta oo u istaaga asaasidda hay'ad waxbarasho, ayna ka go'an tahay dhismaheeda, horumarkeeda, hirgelinteeda, dayactirkeeda, maamulkeeda iyo maalgelinteeda. |
| **25.** | **Xeer dhaqangal ah** | Waxaa loola jeedaa xeer-hoosaadyo ay sameeyeen golaha jaamacaddu sida ku xusan Xeerka. |
| **26.** | **Kulliyadda Tababarada** | Waxaa soo gudo gelaya waxbarashada iyo xirfadaha tacliineed, taasoo u hoggaaminaysa gudoonsiinta shahaado ama dibloomo tababar. |
| **27.** | **Kulliyadda Farsamada** | Waxaa loola jeedaą hay'ad waxbarasho oo bixinaysa waxbarasho farsamo iyo xirfado. |
| **28.** | **Kulliyadda Cilmi-baarista** | Waxaa loola jeeda Hay'ad kasta oo ka shaqaysa cilmi-baarista iyo aqoonta tacliineed ee cilmi-baarista Tacliinta sare. |

## Qodobka 3-aad
## Ujeeddada Xeerka

Ujeeddooyinka Xeerka Tacliinta Sare waa: -

1. In la helo guddi dawladda uga mas'uul ah maamulka tacliinta sare, diiwaan-gelinta, kormeerka iyo hubinta tayada xarumaha waxbarashada Sare.
2. Tayeynta iyo horumarinta tacliinta sare, si loo soo saaro jiil xambaarsan aqoon, xirfad, hal-abuur iyo kartiba.
3. In la dhiirigeliyo xarumaha Waxbarashada Tacliinta Sare, si loo helo xarumo bixiya aqoon dhiirrigeliya koboc dhaqaale, caddaalad, xil-kasnimo iyo qiimeynta nabadda.
4. In la dejiyo siyaasado iyo qorshe hawleed lagu horumarinayo Tacliinta Sare, si loo helo waxbarasho sare oo la wada awoodi karo, loona daboolo baahida waxbarashada sare ee Puntland.
5. Kor-u-qaadidda iyo xoojinta cilmi-baarista ku dhisan aqoonta iyo tignoolajiyadda, si loo daboolo baahiyaha mudnaanta leh ee Puntland.
6. Xaqiijinta madax-bannaanida iyo isla-xisaabtanka Hay'adaha Tacliinta Sare.
7. Kor-u-qaadidda iyo ilaalinta caddaaladda iyo ku dhaqanka sharciga ee hay'adaha tacliinta sare.

8. Kobcinta iyo horumarka hal-abuurka, fekerka, is-dhaliilka iyo falanqaynta arrimaha bulshada.
9. In la taaba-geliyo Tacliinta Sare ee DPL, iyadoo la tix-raacayo Dastuurka Dawladda Puntland Qodobkiisa 32-aad farqadiisa 11-aad.

## Qodobka 4-aad

## Baaxadda Xeerka

Awoodda Xeerkani waxay ku baahsan tahay dhulka Puntland oo dhan, wuxuuna khuseeyaa Hay'adaha Tacliinta sare ee Puntland.

## Qodobka 5-aad

## Mabaadi'da Guud ee Xeerka

1. Shareecada Islaamku waa sharciga Dalka ugu sarreeya, waxaana reebban wixii xeer ah ee ka soo horjeeda sida uu dhigayo Dastuurka Dawladda Puntland Qodobka 9 -aad faqradiisa 4-aad.
2. Dhiirigelinta xuquuqda aadanaha iyo in la helo hannaanka ku dhisan isla-xisaabtan iyo daah-furnaan.
3. Xaqa dhiirigelinta waxbarasho tayo leh iyo xaqa furashada waxbarasho Tacliinta Sare oo gaar ah.
4. Xeerkan waxaa loo fasirayaa si waafaqsan Dastuurka iyo xeerarka kale ee Dawladda Puntland.
5. Wixii muran sharciyeed ah ee ka dhasha xeerkan, waxaa loo gudbinayaa Maxkamadda Sare, si ay u fasirto sida ku cad qodobka 93-aad farqadiisa 5-aad ee Dastuurka DPL.

## CUTUBKA 2-aad
## GUDDIGA TACLIINTA SARE

### Qodobka 6-aad

### Dhismaha Guddiga Tacliinta Sare

1. Xeerkan waxaa lagu asaasayaa Guddiga Tacliinta Sare ee Dawladda Puntland oo ah hay'ad leh shakhsiyad qaanuuneed iyo madax-bannaani maamul, waxayna siyaasad ahaan hoos tagaysaa Wasaaradda Waxbarashada.
2. Guddigu wuxuu yeelanayaa astaan iyo shaabbad u gaar ah oo uu go'aanadiisa ku soo saaro.

### Qodobka 7-aad

### Qaab-dhismeedka Guddiga

1. Guddiga Tacliinta Sare wuxuu ka koobnaanayaa (7) xubnood oo kala ah:
   b) Guddoomiye.
   t) Guddoomiye-Kuxigeen.
   j) Shan (5) xubnood.
2. Guddigu wuxuu yeelanayaa Xoghaye Guddi iyo hawl-wadeenno lagama-maarmaan u ah xil-gudashada Guddiga Tacliinta sare.
3. Magacaabista hawl-wadeennada Guddiga waxaa loo marayaa si waafaqsan Xeerka shaqaalaha rayidka ah ee Dawladda Puntland.
4. Muddo xileedka Guddigu waa shan (5) sano oo ka bilaabmaysa maalinta la magacaabay, dibna waa loo soo magacaabi karaa.

### Qodobka 8-aad

### Xubinnimada Guddiga

Shuruudaha looga baahan yahay xubnaha Guddiga Tacliinta Sare waa: -

1. Inuu yahay muwaadin Soomaaliyeed oo reer Puntland ah, maskax ahaan fiyow.
2. Inuu yahay Muslim ku dhaqma Diinta Islaamka.
3. Inuu haystaa ugu yaraan shahaadada heerka 2-aad (master's degree), jaamacad la aqoonsan yahay.
4. Inaan Da'diisu ka yarayn soddon (30) sano.

5. Guddoomiyaha iyo Guddoomiye ku-xigeenka waxaa looga baahan yahay shahaadada heerka 3-aad oo ah Waxbarashada Sare (Doctor of Philosophy), jaamacad la aqoonsan yahay, leeyihiina aqoon iyo waayo aragnimo la xiriira maamulka tacliinta sare oo aan ka yarayn toban (10) sano.
6. Inuu ku jiro qof garyaqaan ah.

## Qodobka 9-aad

## Habraaca Magacaabista Guddiga

1. Guddoomiyaha, Guddoomiye ku-xigeenka, xubnaha kale ee Guddiga Tacliinta Sare iyo Xoghayaha waxaa loo marayaa tartan furan.
2. Wasaaraddu waxay shaacinaysaa shuruudaha looga baahan yahay Guddiga iyo xoghayaha si waafaqasan xeerkan.
3. Wasiirku wuxuu magacaabayaa Guddi khuburo ah oo ka kala imaanaya Wasaaradda iyo Madaxtooyada, si ay u kala saaraan codsiyada cidda soo dalbatay.
4. Guddigu waa in ay tix-geliyaan aqoonta iyo waayo-aragnimada tartamayaasha ee la xiriira tacliinta sare.
5. Guddigu wuxuu boos kasta u soo xulayaa labada qof ee ugu aqoonta iyo khibrada badan, Wasiirka ayaana u gudbinaya 7 xubnood ee ugu habboon Golaha Xukuumadda si ay u ansixiyaan, Madaxweynaha ayaana wareegto ku soo magacaabaya.
6. Xoghayaha waxaa magacaabaya Wasiirka marka Guddiga xulistu u soo gudbiyo cidda ku habboon.
7. Madaxweynuhu wuxuu ku soo magacaabayaa Guddiga muddo 30 beri gudahood ah.
8. Haddii Madaxweynuhu ku soo magacaabi waayo muddada ku xusan farqada 7-aad ee qodobkan, guddigu wuxuu ku sii shaqaynayaa soo jeedinta Wasiirka.

## Qodobka 10-aad

## Shuruudaha Lagu Lumin Karo Xubinnimada Guddiga

1. Xubinnimada Guddiga Tacliinta Sare waxaa lagu waayi karaa haddii:
   - b. Xubintu ku xad-gudubto Shareecada Islaamka, Dastuurka iyo Xeerka Tacliinta Sare.
   - t. Xubintu lumiso shuruudihii lagu soo magacaabay.
   - j. Ay geeriyooto.
   - x. Soo gudbiso is-casilaad, lagana aqbalo.
   - Kh. Ay la timaado xil-gudasho la'aan sabab kasta ha ku timaadee.
   - d. Xubinta oo xukun kama dambays ah Maxkamad awood u lihi ku xukunto, taasoo uu ku mutaysto ciqaab.
   - r. Xubintu ka-maqnaanto kulamada guddiga saddex (3) fadhi oo isku xiga cudur-daar la'aan.
   - s. Xubinta muddo xileedkeedu dhammaado.
2. Haddii ay dhacdo sida ku xusan farqada 1-aad xarfaha b,t,x, kh,d,r iyo s Wasiirka wasaaradda ayaa soo jeedinaya xil ka qaadista, Madaxweynaha ayaana wareegto ku soo saaraya.
3. Haddii Guddiga Tacliinta Sare ay ku timaado Xil-gudasho la'aan mas'uuliyeed, Wasiirku wuxuu u soo jeedinaya si waafaqsan xeerkan in uu kala-diro Guddiga Tacliinta Sare Madaxweynaha Dawladda Puntland.

## Qodobka 11-aad

## Shuruudaha Xoghayaha Guddiga

Shuruudaha looga baahan yahay Xoghayaha Guddiga Tacliinta Sare waa: -

1. Inuu yahay muwaadin Soomaaliyeed oo reer Puntland ah, maskax ahaana fiyow.
2. Inuu yahay Muslim, kuna dhaqma Diinta Islaamka.
3. Inuu ka haystaa shahaadada heerka 2-aad (Master Degree) jaamacad la aqoonsan yahay.
4. Inaanay da'diisu ka yarayn soddon (30) sano.

5. Inuu leeyahay waayo aragnimo shaqo oo la xiriira maamulka Tacliinta Sare oo aan ka yarayn todoba (7) sano.

## Qodobka 12-aad

## Awoodaha iyo Waajibaadka Guddiga

Awoodaha iyo waajibaadka Guddiga Tacliinta Sare waxaa ka mid ah:-

1. Kor-u-qaadidda, maareynta iyo ilaalinta tayada tacliinta sare.
2. Diyaarinta, dib-u-eegista, siyaasadaha iyo qorshaha tacliinta sare ee Dawladda, iyagoo la kaashanaya bahda tacliinta sare, waxaana ansixinaya Golaha Xukuumadda.
3. Dejinta iyo diyaarinta habraacyo qeexaya shuruudaha looga baahan yahay hirgelinta xarumaha tacliinta sare.
4. Diyaarinta, hirgelinta oggolaanshaha, hubinta tayada waxbarshada tacliinta sare ee la xiriira aasaasidda jaamacadaha, kulliyadaha, diiwaan-gelintooda iyo nidaamka dejinta manaahijta waxbarashada tacliinta sare.
5. Diyaarinta hal-beegyada iyo shuruudaha ay xarumaha tacliinta sare ku bixin karaan shahaadooyinka waxbarashada tacliinta sare.
6. Xaqiijinta hannaanka maamul-wanaagga iyo qaab-dhismeedka maamulka tacliinta sare, si loo sugo heerarka tayada ee xarumaha tacliinta sare ee Puntland.
7. Oggolaanshaha iyo ansixinta codsiyada aasaasidda iyo hirgelinta xarumaha tacliinta sare ee ay ka mid yihiin jaamacadaha iyo kulliyadaha.
8. Bixinta, cusboonaysiinta iyo kala noqoshada ruqsadaha xarumaha tacliinta sare.
9. Dib-u-habeynta iyo qiimaynta xarumaha waxbarashada tacliinta sare iyo barnaamijyada waxbarashada, si ay uga jawaabaan baahiyaha iyo horumarka Puntland.
10. Dabagalka, kormeeridda iyo qiimaynta xarumaha tacliinta sare, si loo xaqiijiyo u hoggaansanaanta heerarka tayada iyo siyaasadaha waxbarashada tacliinta sare.

11. Dhiiri-gelinta wada-shaqeynta xarumaha tacliinta sare, si looga wada faa'iidaysto khibradda, aqoonta iyo cilmi-baarista.
12. Ka-talo-siinta xukuumadda deeqaha loo qoondaynayo jaamacadaha iyo xarumaha kale ee tacliinta sare, si ay u daboolaan baahidooda iyo qiimaynta kharashaadka dawladda ee ku baxaya.
13. Qabashada waajibaad kasta oo la xiriira tacliinta sare kuna xusan xeerarka kale ee Puntland.

## Qodobka 13- aad

## Waajibaadka Guddoomiyaha

Waajibaadka Guddoomiyaha Guddiga Tacliinta Sare waxaa ka mid ah;-

1. Inuu socodsiiyo, maamulo shaqooyinka iyo waajibaadka Guddiga Tacliinta Sare.
2. Inuu metelo, kuna hadlo magaca Guddiga.
3. Inuu guddoomiyo shirarka Guddiga Tacliinta Sare.
4. Inuu soo jeediyo qoondada miisaaniyadda Guddiga Tacliinta Sare, isagoo la kaashanaya Xoghayaha Guddiga wuxuuna u gudbinayaa Wasiirka Wasaaradda, si loogu daro miisaaniyada Wasaaradda.
5. Inuu diyaariyo, isla markaana u soo bandhigo xubnaha guddiga qorshayaasha iyo barnaamijyada shaqo ee Guddiga Tacliinta Sare.
6. Wuxuu soo jeedinayaa dalbashada shaqaalaha iyo hawl-wadeennada Guddigu u baahan yahay, si waafaqsan Qorshaha Guddiga Tacliinta Sare.
7. Inuu saxiixo qoraallada rasmiga ah ee Guddiga Tacliinta Sare.
8. Hagaajinta wada-shaqaynta xubnaha Guddiga, Wasaaradda Waxbarashada, hay'adaha kale ee Dawladda iyo daneeyeyaasha Tacliinta Sare.
9. Inuu abuuro jawi wada-shaqayn oo u dhexeeya Guddiga Tacliinta Sare, hay'adaha dawladda iyo daneeyeyaasha kale.
10. Inuu hirgeliyo habraacyada, siyaasadaha iyo xeerka tacliinta sare.
11. Inuu diyaariyo warbixin sannadeed ku saabsan arrimaha Tacliinta sare, isagoo la kaashanaya Xoghayaha Guddiga.
12. Inuu qabto shaqo kasta oo la xiriira hawlaha shaqo ee Guddiga Tacliinta Sare, si waafaqsan xeerkan.

## Qodobka 14-aad

## Waajibaadka Guddoomiye -ku-xigeenka

Waajibaadka Guddoomiye-ku-xigeenka Guddiga Tacliinta Sare waxaa ka mid ah;

1. Gudashada xilka guddoomiyaha marka guddoomiyuhu maqan yahay sabab kasta ha ku timaadee.
2. Wuxuu guddoomiyaha kala talinayaa waajibaadkiisa shaqo.
3. Hirgelinta Xeerka iyo shaqooyinka Guddiga Tacliinta Sare.

## Qodobka 15 -aad:

## Waajibaadka Xoghayaha Guddiga

Waajibaadka Xoghayaha Guddiga waxaa ka mid ah;-

1. Wuxuu guddoomiyaha ka caawinayaa hawlaha maamulka iyo habsami-u-socodka shaqada Guddiga.
2. Fulinta qorshayaasha iyo barnaamijyada shaqo ee Guddiga.
3. Diyaarinta qorshayaasha iyo barnaamijyada tacliinta sare iyo u gudbinta Guddoomiyaha Guddiga.
4. Hawl-gelinta iyo kormeerka hawl-wadeennada iyo shaqaalaha Guddiga.
5. Diyaarinta miisaaniyadda iyo xisaab-xirka Guddiga, isagoo la tashanaya Guddoomiyaha.
6. Diyaarinta kulamada Guddiga isagoo la tashanaya Guddoomiyaha.
7. Qaadista hadal qoraalka, shirarka Guddiga iyo kaydinta go'aamada Guddiga.
8. Diyaarinta warbixinnada, kaydinta xogaha iyo dukumintiyada Guddiga.
9. Dhaqan-gelinta awaamiirta iyo go'aamada Guddiga ka soo baxa.
10. Qabashada shaqooyinka kale ee Guddoomiyuhu uu u xil-saaro.

## Qodobka 16-aad

## Kulamada iyo Go'aannada Guddiga

1. Guddigu waxay kulan fadhi yeelanayaan sannadkii saddex (3) mar, waxayna yeelan karaan kulamo aan caadi ahayn markii loo baahdo.
2. Kulamada Guddiga Tacliinta Sare waxay ku qabsoomayaan marka ay joogaan ugu yaraan 5 xubnood tirada xubnaha Guddiga.
3. Kulamada aan caadiga ahayn waxaa dalbi kara Guddoomiyaha ama ugu yaraan saddex-meelood labo 2/3 xubnaha Guddiga.
4. Go'aannada guddigu waxay ku ansaxayaan cod-hal-dheeri ah, haddii natiijada tirada codadku is le'ekaato labo wareeg, waxaa mar sadexaadka cod-hal-dheeri ah yeelanaya Guddoomiyaha Guddiga.
5. Xoghayaha Guddigu wuxuu ka qayb gelayaa kulamada guddiga, ra'yigiisana waa ka dhiiban karaa hase yeeshee ma yeelan karo awood codayn.

## Qodobka 17-aad

## Warbixin-Sannadeedka Guddiga

1. Guddigu waa inuu lixdii (6) biloodba mar warbixin u gudbiyaa Wasiirka, waana in warbixintu koobtaa hawlaha qabsoomay, caqabadaha jira iyo talo-bixinta looga gudbi karo caqabadahaas.
2. Guddigu waa in muddo laba (2) bilood gudahood ah ka dib dhammaadka sannad-maaliyadeedka uu u gudbiyaa Wasiirka warbixin ku saabsan hawl-qabadkooda sannad-maaliyadeedkii tegay.
3. Wasiirku wuxuu nuqullada warbixinta hor-geynayaa Golaha Xukuumadda, isla marka uu Guddigu u soo gudbiyo warbixin sannadeedka.



STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 18-aad

## Miisaaniyadda iyo Maaliyadda Guddiga

1. Ilaha dhaqaalaha uu ka soo galo Guddiga waxay kala yihiin: -
   b. Miisaaniyadda uu u qoondeeyo Golaha xukuumaddu, deeqaha, tabarucaadka iyo dakhli kasta oo sifo sharci ah ku soo gala Guddiga.
   t. Dakhliga adeegyada ay u qabtaan dadweynaha, jaamacadaha iyo hay'adaha kale ee Tacliinta sare.
2. Sannad-maaliyadeedka Guddiga wuxuu noqonayaa sannad- maaliyadeedka dawladda ugu yaraan (3) saddex bilood ka hor bilowga sannad-maaliyadeed kasta.
3. Guddigu waa inuu diyaariyaa qiyaasta miisaaniyad-sannadeedka Guddiga ee sannadkaas, iyadoo talo bixin laga siinayo Wasiirka Wasaaradda.
4. Qiyaastu waa inay ku saleeyaan hab-raaca maamul-xisaabeedka dawladda.
5. Guddigu waa inuu ilaaliyaa hab-raaca maamulka maaliyadda dawladda ee la xiriira xisaabaadka iyo hanti-dhawrka.
6. Xisaab-xirka sannadlaha ah ee Guddiga waa in loo diyaariyaa, lana hubiyaa, loona gudbiyaa si waafaqsan xeerkan Hantidhawrka Guud ee Dawladda Puntland.

## CUTUBKA 3-aad
## AASAASIDDA IYO AQOONSIGA HAY'ADAHA TACLIINTA SARE

### Qodobka 19-aad

### Aasaasidda Hay'adaha Tacliinta Sare

Cid kasta oo aasaasaysa ama wax-ka-beddelaysa hay'ad tacliin sare waxaa looga baahan yahay shuruudahan:-

1. Codsi qoraal ah.
2. Magaca iyo ciwaanka xarunta dhexe ee hay'adda waxbarasho.
3. Awooda dhaqaale ee hay'adda waxbarasho.
4. Magaca iyo ciwaanka cidda ka mas'uul ka ah.
5. Magac iyo ciwaanka mulkiilayaasha.
6. Aragtida, himilada iyo ujeeddooyinka hay'adda waxbarasho.
7. Barnaamijyada iyo heerka waxbarasho ama tababar ee hay'adda waxbarasho.
8. Manhajka waxbarashada.
9. Faah-faahinta adeegyada iyo agabyada waxbarasho ee la heli karo, sida maktabadaha, laabab iyo deegaanka.
10. Shuruudaha aqbalaada ardayda cusub.
11. Qorshaha shanta (5) sano ee Jaamacada ama kulliyadda.
12. Nidaamka maamul ee qaybaha tacliinta iyo maamulka hay'addu ku shaqayso.
13. Axdiga hay'adda.
14. Bixinta Khidmada Diiwaangelinta iyo Qiimaynta.

### Qodobka 20-aad

### Bixinta Aqoonsiga

1. Guddigu marka uu qiimayn iyo kormeer ku sameeyo codsiga aasaasidda ee ku xusan qodobka 19-aad, wuxuu soo saaraysaa aqoonsi ku meel-gaar ah.
2. Kadib dhammaadka muddada aqoonsiga ku meel-gaarka ah, waxaa la siinayaa aqoonsiga rasmiga ah.
3. Haddii Guddigu diido bixinta aqoonsiga rasmiga ah wuxuu qoraal ku wargelinayaa sababaha loogu diiday codsiga.

4. Codsadaha loo diiday aqoonsiga rasmiga ah waxaa la siinayaa aqoonsi ku meel-gaar ah muddo hal (1) sano oo kale ah.

5. Aqoonsiga Guddigu bixiyo waa in ku cad yihiin.

   b. Magaca Hay'adda.

   t. Heerka tacliinta iyo nooca Hay'adda.

   J. Nooca aqonsiga (rasmi iyo ku meel-gaar).

   x. Tirada xarumaha.

   kh. Taariikhda la bixiyey aqoonsiga iyo muddada uu shaqaynayo.

   d. Magaca, saxiixa iyo shaabadda Guddiga.

6. Guddigu waxay aqoonsiga ku shaacinayaan Boggaga Guddiga kuwa Wasaaradda iyo Warbaahinta Dawladda.

7. Khidmadda aqoonsiga, waxaa Xeer-nidaamiye ku soo saaraya Guddiga, iyagoo la tashanaya Wasiirka, taasoo lagu soo darayo Miisaaniyadda Dawladda.

## Qodobka 21-aad

## Muddada Aqoonsiga

1. Muddada aqoonsiga ku meel gaarka ah waa labo (2) sano, waxaana la kordhin karaa hal (1) sano oo kale.
2. Muddada aqoonsiga rasmiga ah waa afar (4) sano oo ka bilaabanta maalinta la bixiyey.
3. Ha'yad kasta waxay Guddiga u soo gudbinaysaa codsi aqoonsiga muddo saddex (3) bilood ah ka hor dhammaadka aqoonsiga la siiyey.
4. Guddigu wuxuu go'aanka aqoonsiga codsiga loo soo gudbiyey ku gaarayaa muddo 45 cisho gudahood ah.

## Qodobka 22-aad

## Kala Noqoshada Aqoonsiga

1. Guddigu waxay ugala noqon karaan aqoonsiga hay'ad tacliin sare sababaha soo socda:-

   b. Haddii macluumaadka aqoonsiga lagu bixiyey uu been abuur noqdo.

   t. Haddii hay'adda waxbarasho ku guuldareysato inay saxdo ciladaha mudada loo qabtay.

   j. Haddii hay'adda waxbarasho u hoggaansami waydo xeerkan iyo

habraacyadiisa.

x. Haddii ay ku guuldaraysato inay gaarto ujeeddooyinka ay ka doonayso Tacliinta Sare.

kh. Haddii hay'adda waxbarasho joojiso hawlaheeda shaqo ama xiranto.

d. Haddii ay ku soo buuxin waydo shuruudaha looga baahan yahay muddada loo qabtay.

## Qodobka 23-aad

## Aqoonsiga Jaamacadaha Shisheeye

1. Jaamacad lagu aasaasay meel ka baxsan Soomaaliya oo doonaysa inay Puntland ka bixiso waxbarasho jaamacadeed waa in ay codsi u qorataa Guddiga Tacliinta Sare si ay aqoonsi u hesho si waafaqsan xeerkan.
2. Jaamacad kasta oo dibad ku taal, sida ay qabaan qodobada xeerkan, waxay heshiis iyo iskaashi la geli kartaa hay'ad waxbarasho oo gudaha Puntland ku taal.
3. Jaamacad kasta oo laga leeyahay meel ka baxsan Puntland waa in ay keentaa caddayn aqoonsi, si adeegeedu uga shaqeeyo Puntland.

## CUTUBKA 4-aad
## HA'YADAHA TACLIINTA SARE
## Qodobka 24-aad

## Heerarka Shahaadooyinka Hay'adaha Tacliinta Sare

Tacliinta Sare waxay yeelanaysaa afar heer oo waxbarasho ah:-

b. Waxbarashada macaahidda Tacliinta Sare ama macaahidda farsamada, waxayna bixinaysa shahaadooyin (Diploma), muddo 1-2 sano oo waxbarasho ah.

t. Waxbarashada heerka koowaad, waxayna bixinaysa shahaadooyin heerka koowaad (Degree) oo ah muddo afar (4) sano oo waxbarasho jaamacadeed ah.

j. Waxbarashada heerka labaad (Master) waxay bixinayaan shahaadooyin ugu yaraan laba (2) sano oo waxbarasho ah.

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

x.Waxbarashada heerka saddexaad waxay bixinayaan shahaadooyin saddex ilaa shan (3-5) Sano ah.

## Qodobka 25-aad

## Xarumaha Waxbarashada Tacliinta Sare

1. Xarumaha Waxbarashada Tacliinta Sare waxay u qayb samayaan; -
   b. Jaamacado.
   t. Kulliyado (colleges).
   j. Machaddo.
2. Xarumaha lagu bixinayo tacliinta sare waxay noqon karaan kuwa Dawladeed ama kuwa gaar loo leeyahay, kuwo wadaag ah ama kuwo shisheeye, waxayna kala yihiin,
   b. Xarumaha Tacliinta sare ee ay Dawladdu leedahay.
   t. Xarumaha Tacliinta sare ee gaarka loo leeyahay.
   j. Xarumaha Tacliinta sare ee laga soo dhambalay jaamacado ay wadama kale leeyihiin.
   x. Xarun tacliin sare oo wadaag ah.

## Qodobka 26-aad

## Waajibaadka Hay'adaha Tacliinta Sare

Hay'adaha Tacliinta Sare waxay leeyihiin mas'uuliyadahan soo socda:-

1. Ilaalinta ujeeddooyinka tacliinta sare iyo qiyamka hagaya hay'adda, si loo ilaaliyo tayada adeegga waxbarashada.
2. Horumarinta barnaamijyada waxbarashada iyo bixinta tacliinta sare.
3. Soo saaridda ardayd u qalanta aqoonta, xirfadaha iyo hab-dhaqanka looga baahan yahay tacliinta sare.
4. Samaynta iyo dhiirigelinta daraasaad, cilmi-baaris iyo bixinta adeegyada bulshada mudnaanta leh.
5. Samaynta mashaariic waxbarasho iyo cilmi-baarisyo wadajir ah oo lala yeesho Hay'adaha Tacliinta Sare iyo xarumaha cilmi- baarista ajnabiga ah.
6. Maamulidda dhaqaalaha iyo hantida kale, si waafaqsan xeerkan iyo xeerarka kale ee dhaqan-galka ah.

7. Dejinta iyo fulinta xeer-hoosaadyo waafaqsan xeerkan.
8. Diyaarinta, fulinta qorshayaasha iyo soo gudbinta warbixinaha hawl-gudashada.
9. Bixinta shahaado sharafta la siiyo dadka guulaha muuqda sameeyey ama wax ku soo kordhiyey bulshada Puntland iyo ummadda Soomaaliyeed.
10. Gacan siinta, waxbarashada dugsiyada hoose, sare iyo xarumaha farsamada gacanta sida ugu habboon.
11. Gudashada waajibaadyada kale ee xeerkan iyo habraacyadiisu dhigayaan.

## Qodobka 27-aad

## Shakhsiyad Qaanuuneed

Ha'yadaha lagu aasaasay xeerkan waxay leeyihiin shakhsiyad qaanuuneed, waxayna xaq u leeyihiin in ay hanti yeeshaan, heshiisyo galaan iyo inay wax-dacwayn karaan lana dacweyn karo.

## Qodobka 28-aad

## La-talinta iyo Hagidda Ardeyda

1. Xarun kasta oo waxbarasho sare, iyadoo u maraysa qaybaha ay khusayso waa in ay si sax ah ugu wargelisaa ardeyda soo codsata barnaamijyada waxbarasho ee la heli karo iyo shuruudaha barnaamij/maadda walba.
2. Caawisaa ardayda inta lagu guda jiro waxbarashada, iyadoo la siinayo tallooyin, waayo aragnimo-aqooneed iyo tallooyin la xiriira waxbarashadooda.

## CUTUBKA 5- aad
## HABKA MAAMULKA HA'YADAHA TACLIINTA SARE

### Qodobka 29-aad
### Jaamacdaha iyo Kulliyadaha Dawladda

Jaamacadaha Dawladda, Kulliyadaha iyo Macaahiddu waxay yeelanayaan xeer-hoosaadyo u gaar ah oo waafaqsan Xeerka Tacliinta Sare.

### Qodobka 30-aad
### Hay'adaha Tacliinta Sare Ee Gaarka Loo Leeyahay

1. Hay'adaha Tacliinta Sare ee gaarka loo leeyahay waa in ay yeeshaan qaab-dhismeed maamul oo cad si loo hubiyo hufnaanta, tayada waxbarasho iyo isla xisaabtanka.
2. Qaab-dhismeedka Maamulka ee Hay'adaha Tacliinta Sare waxaa ka mid ah;
   - b. Golaha Sare ee Hay'adda (Guddiga Sare / Guddiga Maamulka).
   - t. Madaxweynaha ama Guddoomiyaha Hay'adda.
   - j. Guddoomiye Ku-xigeenka.
   - x. Golaha Tacliinta.
   - Kh. Golaha Cilmi-baarista.
3. Waajibka Maamulka Hay'adaha Tacliinta Sare waxaa lagu qeexayaa Xeer-hoosaadyadooda si waafaqsan Xeerkan.

### Qodobka 31-aad
### Guddoomiyaha iyo Guddoomiye ku-xigeennada Jaamacad Dawladeed

1. Jaamacad dawladeed oo kasta waxay yeelanaysaa Guddoomiye iyo Guddoomiye-ku-xigeenno.
2. Guddoomiyaha iyo ku-xigeennada waxaa soo jeedinaya Wasiirka Wasaaradda Waxbarashada, waxaan magacaabaya Madaxweynaha Dawladda Puntland.

## Qodobka 32-aad

## Hawl-wadeennada Jaamacadda

Hawl-wadeennada akaadeemiga iyo kuwa maamulka jaamacadaha waxay noqon doonaan sida ku cad xeer-hoosaadyada jaamacadaha.

## Qodobka 33-aad

## Ururka Ardayda

1. Jaamacad waliba waxay yeelan doontaa urur arday.
2. Urur walba wuxuu dooran doonaa gole arday, kuwaasoo waxqabadkoodu noqon doono:-
    b. Iyagoo la tashanaya golaha sare ee ururka ardayda waxay kor joogteeyaan qorshaha wax-qabadka ardayda, si kor loogu qaado maslaxadda, aqooneed, anshaxa iyo bulsho-wanaagga ardayda.
    t. Inay u soo jeediyaan golaha sare ee ururka ardayda ama kuwa la midka ah, waxyaabaha saamaynta ku leh nolol wanaagga ardeyda
    j. Inay qabtaan wixii kale oo hawl ah ee uu muujinayo xeerarkooda maamul ee golaha sare ee ardaydu ansixiyeen.

## Qodobka 34-aad

## Ururka Qalin-jabiyaasha Ardayda

1. Jaamacad waliba waxay samaysan kartaa ururka qalin-jebiyayaal, kuwaasoo ka koobnaanaya ardaydii ka qalin jebisay jaamacadda.
2. Ururka ardaydu wuxuu u dhaqmi doonaa sida gole is-dhexgal ah oo ay ku kulmaan xubnuhu sida ku xusan faqrada 1-aad, isla markaana ay gutaan shaqooyinka kale ee uu muujinayo xeerka jaamacaddu.

## Qodobka 35-aad

## Kulamada Hay'ad Tacliin Sare

Hay'adaha Tacliin Sare waa inay kulamadeeda u qabtaan sida ku xusan xeer-hoosaadyadooda iyo Habraacyadooda waafaqsanna Xeerkan.

## Qodobka 36-aad

## Cilmi-baarista Ha'yadaha Tacliinta Sare

1. Hay'adaha Tacliinta sare waa in ay sanadkiiba sameeyaan Cilmi-baarisyo taabanaya caqabadaha iyo baahiyaha bulsho.
2. Hay'adaha Tacliinta sare waxay si wada jir ah u samayn karaan Cilmi-baaris.
3. Guddiga tacliinta sare wuxuu cayimayaa tirada cilmi-baarisyo looga baahan yahay Hay'adaha Tacliinta sare.
4. Guddigu wuxuu samaynayaa bandhig sanadeedka Cilmi-baarisyada la sameeyey.

# CUTUBKA 6-aad

# MAALIYADDA GUUD EE JAAMACADAHA

## Qodobka 37-aad

## Dakhliga Jaamacadaha Dawladda

Dakhliga jaamacad dawladeed wuxuu ka koobnaan karaa:-

b. Miisaaniyadda loo ansixiyey.

t. Khidmadaha adeegyada.

j. Dakhliyada ka soo gala ilaha kale ee xeer hoosaadyada Hay'adaha Tacliinta Sare lagu xusi doono si waafaqsan xeerkan.

## Qodobka 38-aad

## Hanti-kasbasho

Dhammaan hantida ma-guurtada ah iyo hantida guurtada ah ee ay ku shaqeynayso jaamacad dawladeed waxay noqonayaan hanti ay leedahay jaamacad dawladeed, waana in lagu diiwan-geliyaa magaca jamacadda.

## Qodobka 39-aad

## Maalgelinta Dakhliga

1. Jaamacad dawladeed, si sharciga waafaqsan, waxay sameysan kartaa maalgashi dakhliga soo gala.
2. Maalgelinta ay ku samaynayso jaamacad dawladeed dakhligeeda, si waafaqsan faqradda 1-aad, waa inay oggolaansho uga heshaa Golaha Sare ee Jaamacadda.

## Qodobka 40-aad

## Xisaabaadka iyo Hanti-dhawrka

1. Jaamacad dawladeed waa inay ilaalisaa dhammaan buugaagta diiwaannada xisaabaadka dakhliga, kharashaadka iyo hantida jaamacadda.
2. Jaamacad dawladeed waa inay Hanti-dhawrka Guud u gudbisaa xisaabaadka jaamacadda laba (2) bilood ka dib dhammaadka sannad maaliyadeed kasta oo ay la socdaan:-
   b. Warbixin qeexaysa dakhliga iyo kharashaadka jaamacadda intii lagu gudo-jiray sannad-maaliyadeedka.
   t. Warqadda isku dheellitirka xisaabaadka jaamacadda ilaa maalintii ugu dambeysay sannadka.
3. Xisaab-xirka sannadlaha ah ee xisaabaadka jaamacadaha dawladda waa in loo diyaariyaa, loo hubiyaa, loona gudbiyaa si waafaqsan xeerarka Maamulka Maaliyadda iyo Hanti-dhawrka Guud ee Dawladda Puntland.

## Qodobka 41-aad

## Sannad-maaliyadeedka

Sannad-maaliyadeedka Hay'ad Tacliinta Sare ee Dawladeed waa inuu la mid noqdaa sannad-maaliyadeedka Dawladda.

## Qodobka 42-aad

## Maamulka Maaliyadda Jaamacadaha Gaarka ah

1. Jaamacad kasta oo gaar loo leeyahay, si waafaqsan maabaadi'da guud ee xisaabaadka iyo hab-raacyadooda waa inay:-
   b. Ilaaliso buugaagta iyo diiwaannada dakhliga iyo kharashaadka, hantida iyo daymaha.
   t. Diyaariso warbixin-maaliyadeed ugu badnaan 2 (labo) bilood ka dib dhammaadka sannadka, waana inay la socdaan warbixinta dakhliga, kharashaadka sannadkii tegay, warqadda isku dheelli-tirka xisaabaadka tan iyo sannadkii tegay.

2. Jaamacad kasta oo gaar loo leeyahay inta lagu gudo-jiro sannad maaliyadeedka waa in:
   b. Ay diyaariso warbixin hanti-dhawr sannadle ah oo ay sameysay hay'ad hanti-dhawr madax-bannaan oo diiwaan-gashan.
   t. Ay u gudbisaa maamulka sare ee jaamacadda nuqulka rasmiga ah ee warbixinta hanti-dhawraha si sannadle ah.
   j. Ay u hoggaansanto dhammaan xeerarka maaliyadeed, ayna bixiso dhammaan waajibaadka maaliyadeed ee ay dawladda ku leedahay si waafaqsan sharciga.
   x. Ay xisaabiso dhammaan maaliyadda uga timaadda dawladda, haddii ay jirto.
   Kh. Ay u soo gudbiso Guddiga, markuu ka dalbado warbixin- maaliyadeed iyo hanti-dhawr, iyadoo aan Guddigu baahin karin xogta maaliyadeed, haddii aan oggolaansho laga helin jaamacadda ay khuseyso ama hay'adaha dawladda ee awoodda u leh.

## Qodobka 43-aad

## Maalgelinta Dakhliga Jaamacadaha Gaarka ah

Jaamacad gaar loo leeyahay waxay maaliyadeeda ku maalgashan kartaa hadba sidii ay u ansixiso cidda mas'uulka ka ah, si waafaqsan Xeerkan.

## CUTUBKA 7-aad

## GANAAXYADA HANNAANKA CABASHOOYINKA IYO CIQAABAHA

## Qodobka 44-aad

## Ganaaxyada Maamul

Ganaaxyada maamul waxaa lagu soo rogayaa hay'ad tacliineed ama shaqsi gaar ah (macallin, maamulka sare iyo Arday.) Haddii lagu helo ku xad-gudub nidaam, tayo ama Xeer.

## Qodobka 45-aad

## Noocyada Ganaaxyada Maamul

1. Digniin Qoran, marka lagu helo khalad yar ama khaladkii ugu horreeyay.
2. Hakin Barnaamij marka barnaamij tacliimeed laga helo tayo xumo, macallin la'aan, ama maamul xumo
3. Joojinta diiwaangelin cusub, marka hay'addu buuxin weydo shuruudaha laga rabo, gaar ahaan ku-meel gaar ama arday ka badan xadka rasmiga.
4. Ganaax Lacageed, marka ay jirto u hoggaansamid la'aan kormeer iyo dabagal.
5. Hakinta ama kala noqosho Aqoonsi, marka hay'addu si joogto ah ugu fashilanto shuruudihii aqoonsiga ama been abuurto.
6. Talaabo kastoo kale oo u muuqan karta anshaxmarin ama ganaax maamul.
7. Ganaaxyada lacageed waxaa lagu qeexayaa habraac gaar ah oo guddigu soo saaro.

## Qodobka 46-aad

## Hannaanka Cabashada

1. Hay'adaha ama shaqsiyaadka lagu rido ganaaxo maamul waxay xaq u leeyihiin inay cabasho ka qaataan go'aanka maamulka ee Guddiga Tacliinta Sare.
2. Cabashada waxaa loo gudbinayaa Wasiirka Wasaaradda muddo shan iyo toban (15) beri gudahood ah, marka go'aanka guddigu soo gaaro.
3. Wasiirku wuxuu muddo soddon (30) beri gudahood ah go'aan kaga gaarayaa cabashada loo soo gudbiyey, isagoo dhegaysanaya dhinacyada, qiimaynayana caddaymaha iyo doodaha dhinacyada.
4. Ciddii aan ku qancin go'aanka Wasiirka waxay Cabasho u qaadanaysaa Maxkamadda Sare muddo soddon (30) beri gudahood ah, marka ay go'aanka Wasaaradda hesho.

## Qodobka 47-aad

## Ciqaabaha

1. Ciqaabuhu waxay la xiriiraan falal si ula kac ah u jabinaya Xeerkan iyo habraacyadiisa, kuwaasoo aan lagu xallin karin ganaax maamul oo keliya una baahan tallaabo sharciyeed.
2. Guddigu waxay ku wargelinaysaa Hay'adaha ku shaqada leh fal dembiyeedyada laga shakisan yahay si loo baaro.
3. Dacwadaha ciqaabta ah waxaa qaadayaa Maxkamadda awooda u leh, iyadoo la raacayo Xeerka Habka Ciqaabta Soomaaliyeed.
4. Eedaysanuhu wuxuu xaq u leeyahay difaac sharci iyo maxkamadayn caddaalad ah.

## CUTUBKA 8-aad

## QODOBADA QUBANAHA

## Qodobka 48-aad

## Magac-ka-beddelka Hay'ad Tacliin Sare

1. Golaha Maamulka Sare ee Hay'ad Tacliinta Sare ee Dawladeed wuxuu soo jeedin karaa in laga beddelo hay'adda magaceeda hadduusan ka hor imaanayn dhaqanka iyo Diinta Islaamka waana inuu Guddiga magaca cusub ku soo saaro warqad rasmi ah.
2. Haddii hay'adda magaca laga beddelayo ay tahay mid ku dhisan Xeer Baarlamaan waxaa keliya oo magaca looga beddeli karaa wax-ka-beddelka xeerka ay ku dhisan tahay.
3. Haddii ay tahay hay'addu mid gaar ah ayna soo go'aamiyaan maamulka iyo mulkiilayaasha jaamacadda maal-geliya in laga beddelo magaca waxay codsigooda u gudbinayaan Guddiga, si waafaqsan xeerkan.

## Qodobka 49-aad

## U-hoggaansanaan La'aanta Xeerkan

Qof ama hay'ad walba oo u hoggaansami-weyda ama jebisa qodobbada xeerkan, waxaa falkeeda loo aqoonsanayaa xad-gudub, waxaan lagu ciqaabayaa si waafaqsan shuruucda Puntland.

## Qodobka 50-aad

## Isku-biiridda Hay'ado Tacliin Sare ee Dawladeed

Marka ay dhacdo inay isku biiraan hay'ado Tacliin Sare ee Dawladeed waxaa go'aan ka gaaraya Guddiga Tacliinta Sare markuu:-

1. Guddigu warbixin tafa-tiran u diro Wasiirka, iyadoo lagu caddeynayo asbaabaha isku-biiritaanka, waajibaadka maamul iyo maaliyadeed ee ka dhalan kara.
2. Hay'adda Tacliinta sare ee ku xusan faqradda 1-aad ee qodobkan waxaa loo tix-gelinayaa inay tahay hay'ad Tacliin Sare ee Dawladeed oo ku dhisan si waafaqsan xeerkan.

## Qodobka 51-aad

## Ka ilaalinta Qaan-dhabid Shakhsiyadeed

Wax kasta oo uu ku kaco qof xubin ka ah Guddiga, Jaamacad ama kulliyad farsamo, Tababare ama sarkaal kasta, hawlwadeen, ama wakiil haduu shaqadiisa iyo awoodihiisa u gudanayo si niyad sami ah ma gayeysiin doonto xubinta, sarkaalka, hawlwadeenka, wakiilka ama qof kale oo xilkiisa ku gudanaya isdiristiisa inuu si shakhsiyan ah ugu qoolnaado fal, sheegasho ama dalab, wax kasta ha noqotee.

## Qodobka 52-aad

## U Qoolnaanta Waxyeellooyinka

Qodobka 52-aad ee xeerkan kama qaadeyso hay'ada inay ka gar baxdo waxyeelada dhacday, inay siiso magdhaw qof walba oo dhaawac ku soo gaaro naftiisa ama hantidiisa, ama qof walba danihiisu saameyn xumi ka soo gaartay isagoo isticmaalaya awoodihiisa uu xeerkani siiyey, ama xeer kale oo qoran, ama fashil ku yimaada qayb ahaan ama guud ahaan shaqooyinka.

## Qodobka 53-aad

## Xeer Nidaamiyeyaal iyo Habraacyo

Guddiga Tacliinta Sare isagoo la tashanaya Wasiirka Wasaaradda iyo daneeyayaasha kale wuxuu soo saarayaa Xeer nidaamiyeyaal iyo Habraacyo lagu fulinayo Xeerkan.

## Qodobka 54-aad

## Burin

Waxaa la laalay xeer, xeer-hoosaad, habraac iyo wareegta kasta oo aan waafaqsanayn ama la jaanqaadi karin qodobada xeerkan.

## Qodobka 55-aad

## Dhaqan-galka Xeerka

Xeerkani wuxuu dhaqangelayaa marka Golaha Wakiilladdu ansixiyo, Madaxweynaha Dawladda Puntland saxiixo, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda Puntland.